جمهورية مصر العربية
وزارة الأوقاف

22 ذو الحجة 1440هـ
23 أغسطس 2019م

# الصحبة وأثرها في بناء الشخصية

# Saaxiibtinnimada iyo sidey u saameyso dhisidda shakhsiyadda

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah kaasoo oo kitaabkiisa kariimka ah ku yiri:

{الْأَخِلَّاءُ يَوْمَئِذٍ بَعْضُهُمْ لِبَعْضٍ عَدُوٌّ إِلَّا الْمُتَّقِينَ }

**(Saaxiibadu Maalinta qiyaame qaarkood qaarka (kale) waa u col kuwa dhawrsaday mooyee (mu'miniinta).)**

Waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa, Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa, iyo qofkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Intaas kaddib:**

Aadanaha waa bulsho fidradiisa marka la eego, bulshadiisa ayuu ku noolaanayaa, wuuna ka shidaalqaadanayaa wuuna la jaanqaadayaa iyadoo loo soo marayo sifooyinkiisa shakhsiga oo ka duwan noolaha kale, la fariisashada iyo isubarbardhigidda saameyn cad ayay ku leedahay fikirka aadahana, waana sababka xaddidaya meesha uu ku dhammaanayo iyo liibaantiisa adduun iyo aakhiraba.

Waxaan shaki ku jirin inaan u baahan nahay shakhsiyad toosan oo leh qiimaha ugu sarreeya ee dadnimo, iyo darajooyinka ugu sarreeya iyo wadaninimo, siduu noogu soo baxo jiil wax dhisaya oon wax duminin, waxna cammiraya oon wax kharribaynin, kana hormarinaya maslaxada dalka guud maslaxad kaste.

Shareecada waxay amartay shakhsiyadda si fiican in loo dhiso, sidey u noqoto shakhsiyad wax fahmaysa, oo ogaan karta halista, noloshana si fiican ugu hortagi karta, iskana ilaalin karta fitnooyinka iyo shubuhaadka.

wuxuu yiri Alle:

**{وَاتَّقُوا فِتْنَةً لَّا تُصِيبَنَّ الَّذِينَ ظَلَمُوا مِنكُمْ خَاصَّةً } .**

(**Iska islaaliya Fidno oon ugu dhacaynin kuwii dulmiga falay gaar ahaan oo idinka mid ah, ogaadana in Alle ciqaabtiisu daran tahay**)

Sidoo kale shareecada waxay ku toosisay aadanaha inuu noqdo mid shakhsiyad isku kalsoon leh oo aan shakinin, oo fahmaysa waxtarka raacaysana xaqqa, kuwa tiimbadana aan la tiimbanin, wuxuu leeyahay rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**(لَـا تَكُونُـوا إِمَّعَةً ؛ تَقُولُـونَ : إِنْ أَحْسَـنَ النَّـاسُ أَحْسَـنَّا ، وَإِنْ ظَلَمُـوا ظَلَمْنَـا، وَلَكِـنْ وَطِّنُـوا أَنْفُسَـكُمْ ، إِنْ أَحْسَـنَ النَّـاسُ أَنْ تُحْسِـنُوا ، وَإِنْ أَسَاءُوا فَلَا تَظْلِمُوا)**

(**Ha noqonina qofaan shakhsiyad lahayn, waxaad dhahaysaan: haddii dadka ay wanaag sameeyaan wanaag ayaan sameynaynaa, hadday dulmi ku kacaan dulmi ayaan ku kacaynaa, laakin celiya naftiina, hadday wanaag sameeyaan dadka inaad wanaag sameysaan, hadday xumaan sameeyaanna dulmi ha samynina**).

Waxaan shaki ku jirin inay ka mid yihiin arrimaha ugu muhimsan oo saameynta weyn ku leh dhisidda shakhsiyadda aadanaha: saaxiibtinnimada, qofka wuxuu ku soomoobayaa saaxiibkiisa wuxuuna ku raacayaa xagga fikirka iyo caqiidada iyo dhaqanka iyo camalka, taasna waxaa daliil u ah sharciga iyo caqliga iyo tijaabada iyo waaqaca iyo waxa loo jeedo.

waa kan, saaxiibtinnimada suuban waxay u leedahay ahamiyad weyn dhisidda shakhsiyad toosan oo diinteeda anfacaysa iyo dalkeeda iyo bulshadeeda,

taasna waa siduu ku barbaariyay nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - asxaabtiisa qiimaha leh oo Abuu Bakar ugu horreeya - Ilaahay raalli haka noqdee - kaasoo tusaalooyinka ugu qiimaha badan muujiyay xagga saaxiibtinnimada iyo oofinta xaqqeeda, taasna waa marka ay ku dhaheen reer Makka: saaxiibkaaga wuxuu sheegayaa in loo dheelmiyay xalay Baytulmaqdis kaddibna uusoo laabtay, wuxuu yiri asoo ka haysta saaxiibkiisa yaqiin iyo kalsooni: hadduuba sidaas yiri waa runtiisa, waxaan ka rumaysanaynaa taas wax ka fog waxaan ka rumaysanaynaa warka cirka.

Sidan waa sidey ahaayeen asxaabta nabiga dhexdooda, waana kuwa ugu khayrka badan oo lagu daydo xagga saaxiibtinnimada wanaagsan oo fiican oo ku dhisan walaaltinnimada iyo isuhuridda iyo isu nisbeynta (umadda) iyo midnimada iyo camalka wanaagsan oo waxtarka leh iyo kalgacalka iyo isu naxariisashada.

**فعَن النُّعْمَانِ بْنِ بَشِيرٍ (رضي الله عنهما) قَالَ : قَالَ رَسُولُ اللَّهِ (صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) : (مَثَلُ الْمُؤْمِنِينَ فِي تَوَادِّهِمْ وَتَرَاحُمِهِمْ وَتَعَاطُفِهِمْ مَثَلُ الْجَسَدِ ؛ إِذَا اشْتَكَى مِنْهُ عُضْوٌ تَدَاعَى لَهُ سَائِرُ الْجَسَدِ بِالسَّهَرِ وَالْحُمَّى) .**

Waxaa laga wariyay Annucmaan bin Bashiir –Ilaahay raalli haka noqdee - inuu yiri rasuulka Alle - naxariis iyo

nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -: (**mu'miniinta tusaalahooda xagga isjacaylkooda iyo isu naxariisashadooda iyo isu dhimrintooda waa sida jirka oo kale, marka xubin ka sheegato jirka oo dhan dhafar iyo qandho ayuu ka sheegtaa**).

Sidoo kale waxay leedahay la saaxiibidda dadka suuban barakadeeda iyo fadligeeda adduun iyo aakhiraba, wuxuu yiri rasuulka - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee -:

**(إِنَّ لِلَّهِ تَبَارَكَ وَتَعَالَى مَلَائِكَةً سَيَّارَةً ، فُضُلًا يَتَتَبَّعُونَ مَجَالِسَ الذِّكْرِ ، فَإِذَا وَجَدُوا مَجْلِسًا فِيهِ ذِكْرٌ ، قَعَدُوا مَعَهُمْ ، وَحَفَّ بَعْضُهُمْ بَعْضًا بِأَجْنِحَتِهِمْ ، حَتَّى يَمْلَئُوا مَا بَيْنَهُمْ وَبَيْنَ السَّمَاءِ الدُّنْيَا ، فَإِذَا تَفَرَّقُوا ، عَرَجُوا وَصَعِدُوا إِلَى السَّمَاءِ ، قَالَ : فَيَسْأَلُهُمُ اللهُ عَزَّ وَجَلَّ ، وَهُوَ أَعْلَمُ بِهِمْ : مِنْ أَيْنَ جِئْتُمْ؟ فَيَقُولُونَ : جِئْنَا مِنْ عِنْدِ عِبَادٍ لَكَ فِي الْأَرْضِ ، يُسَبِّحُونَكَ ، وَيُكَبِّرُونَكَ ، وَيُهَلِّلُونَكَ ، وَيَحْمَدُونَكَ ، وَيَسْأَلُونَكَ ، قَالَ : وَمَاذَا يَسْأَلُونِي؟ قَالُوا : يَسْأَلُونَكَ جَنَّتَكَ ، قَالَ : وَهَلْ رَأَوْا جَنَّتِي؟ قَالُوا : لَا ، أَيْ رَبِّ ، قَالَ : فَكَيْفَ لَوْ رَأَوْا جَنَّتِي؟ قَالُوا : وَيَسْتَجِيرُونَكَ ، قَالَ : وَمِمَّ يَسْتَجِيرُونَنِي؟ قَالُوا : مِنْ نَارِكَ يَا رَبِّ ، قَالَ : وَهَلْ رَأَوْا نَارِي؟ قَالُوا : لَا ، قَالَ: فَكَيْفَ لَوْ رَأَوْا نَارِي؟ قَالُوا : وَيَسْتَغْفِرُونَكَ ، قَالَ:**

**فَيَقُولُ: قَدْ غَفَرْتُ لَهُمْ ، فَأَعْطَيْتُهُمْ مَا سَأَلُوا ، وَأَجَرْتُهُمْ مِمَّا اسْتَجَارُوا ، قَالَ : فَيَقُولُونَ : رَبِّ فِيهِمْ فُلَانٌ عَبْدٌ خَطَّاءٌ ، إِنَّمَا مَرَّ فَجَلَسَ مَعَهُمْ ، قَالَ : فَيَقُولُ : وَلَهُ غَفَرْتُ ، هُمُ الْقَوْمُ لَا يَشْقَى بِهِمْ جَلِيسُهُم) .**

**(Allaha sarreeya waxaa u sugnaatay malaa'ig socod ku jirta oo qiima leh, waxay raaraacayaan meelaha Alle lagu xuso, hadday arkaan fadhi Alle xusayo way la fariistaan, qaarkooda qaarka kale garbahooda ayay ku hareereeyaan ilaa ay buuxiyaan inta u dhexeysa iyaga ilaa samada dhow, markay kala tagaan cirka ayay fuulayaan, wuxuu yiri: Ilaahay -cazza wajalla -ayaa weyddiinaya asoo og: halkeed ka timaaddeen? waxay oranayaan: waxaan ka nimid addooman dhulka kuu jooga oo kugu tasbiixsanaya kuna weynaynaya kuna mideynaya kuguna mahdinaya waxna ku weyddiinaya, wuxuu dhahaa: maxay i weyddiinayaan? waxay dhahayaan: waxay ku weyddiinayaan jannadaada, wuxuu oranayaa; jannadeyda ma arkeen? waxay dhahayaan: maya rabbiyow, wuxuu dhahaa: ka warama haddey jannadeyda arki lahaayeen? waxay dhahayaan: way ku magangalayaan, wuxuu dhahaa maxay ka magangalayaan? waxay dhayahaan naartaada rabbiyow, wuxuu dhahaa: naarteyda ma arkeen? waxay dhahaan: maya, wuxuu dhahaa; ka warama haddey naartayda arki lahaayeen? waxay**

**dhahaan: dambidhaaf ayay ku weyddiisanayaan, wuxuu yiri: wuxuu dhahaa: waan u dhaafay waxaanna siiyay waxay weyddiisteen, waxaanna ka magangaliyay wixii ay iga magangaleen, wuxuu yiri waxay dhahayaan: rabbiyow waxaa ku dhex jira addoon gaf badan, wuu soo maray wuuna la fariistay kaliya wuxuu yiri: wuxuu dhahaa: asagana waan u dhaafay, dadkan midka la fariisto kuma hoogo**).

Saaxiibtinnimada suuban miraheeda waxaa ka mid ah inay sabab u tahay jacaylka Alle - cazza wajalla - iyo liibaanta jannada

**فعَنْ أَبِي هُرَيْرَةَ (رضي الله عنه) عَنِ النَّبِيِّ (صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) (أَنَّ رَجُلًا زَارَ أَخًا لَهُ فِي قَرْيَةٍ أُخْرَى ، فَأَرْصَدَ اللهُ لَهُ عَلَى مَدْرَجَتِهِ مَلَكًا ، فَلَمَّا أَتَى عَلَيْهِ ، قَالَ : أَيْنَ تُرِيدُ؟ قَالَ : أُرِيدُ أَخًا لِي فِي هَذِهِ الْقَرْيَةِ ، قَالَ : هَلْ لَكَ عَلَيْهِ مِنْ نِعْمَةٍ تَرُبُّهَا؟ قَالَ : لَا ، غَيْرَ أَنِّي أَحْبَبْتُهُ فِي اللهِ (عَزَّ وَجَلَّ) ، قَالَ : فَإِنِّي رَسُولُ اللهِ إِلَيْكَ بِأَنَّ اللهَ قَدْ أَحَبَّكَ كَمَا أَحْبَبْتَهُ فِيهِ) .**

Waxaa laga wariyay Abuu Hureyra –Ilaahay raalli haka noqdee - in nin booqday walaalkiisa ku sugan toolo kale, Ilaahay wuxuu ugu diyaariyay waddadiisa malag markuu u yimid: wuxuu yiri: halkeed rabtaa? Wuxuu yiri: waxaan rabaa walaalkeyga ku sugan tooladan, wuxuu yiri: wax dan miyaad ka leedahay, wuxuu yiri: maya, laakin

Ilaahay dartiisa ayaan u jeclaaday, wuxuu yiri: aniga waxaan ahay qof Ilaahay igakaa soo diray, Ilaahay wuxuu kuu jeclaaday sidaad u jeclaatay)

Sidaas oo kale waxay sabab u noqonaysaa in lagula soo kulmiyo maalinta qiyaame (qofkaad jeceshay).

**فعَنْ أَنَسِ بْنِ مَالِكٍ (رضي الله عنه) أَنَّ رَجُلاً سَأَلَ النَّبِيَّ (صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) عَنِ السَّاعَةِ ، فَقَالَ : مَتَى السَّاعَةُ؟ قَالَ: (وَمَاذَا أَعْدَدْتَ لَهَا؟) ، قَالَ : لاَ شَيْءَ ، إِلَّا أَنِّي أُحِبُّ اللَّهَ وَرَسُولَهُ (صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) ، فَقَالَ : (أَنْتَ مَعَ مَنْ أَحْبَبْتَ) ، قَالَ أَنَسٌ : فَمَا فَرِحْنَا بِشَيْءٍ ، فَرَحَنَا بِقَوْلِ النَّبِيِّ (صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) : (أَنْتَ مَعَ مَنْ أَحْبَبْتَ) ، قَالَ أَنَسٌ : فَأَنَا أُحِبُّ النَّبِيَّ (صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) وَأَبَا بَكْرٍ ، وَعُمَرَ ، وَأَرْجُو أَنْ أَكُونَ مَعَهُمْ بِحُبِّي إِيَّاهُمْ ، وَإِنْ لَمْ أَعْمَلْ بِمِثْلِ أَعْمَالِهِمْ .**

Waxaa laga wariyay Anas bin Maalik – Ilaahay raalli haka noqdee - in nin weyddiiyay nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - saacadda qiyaame, wuxuu yiri; waa goorma saacadda? Wuxuu yiri: (**maxaad u diyaarsatay?**) wuxuu yiri: waxba, laakin aniga waxaan jeclahay Alle iyo rasuulkiisa, wuxuu yiri: (**adiga waxaad la jiraysaa qofkaad jeclaato**) Anas wuxuu yiri: hadalka nabiga saan ugu faraxnay wax aan ugu faraxnay ma jiro

kaasoo ah: (**adiga waxaad la jiraysaa qofkaad jeclaato**) wuxuu yiri Anas: aniga waxaan jeclahay Nabiga iyo Abuu bakar iyo Cumar waxaan rajaynayaa inaan iyaga kula jiro jacaylkayga dartii oon iyaga jeclahay xataa haddaanan sameynin camalkooda oo kale.

Maxaa ka fiican Imaam Shaafici markuu yiri:

**أُحِبُّ الصالِحينَ وَلَستُ مِنهُم * * * لَعَلّي أَن أَنالَ بِهِم شَفاعَة**

**وَأَكرَهُ مَن تِجارَتُهُ المَعاصي * * * وَلَو كُنّا سَواءً في البِضاعَة**

**Waxaan jeclahay dadka suuban anoon ka mid ahayn***
**waxaan rajaynayaa inaan shafeeco ku helo**
**waxaan nacayaa kan shaqadiisu tahay macsi ***
**xataa haddaan ka mideysan nahay badeecada**

Sidaas oo kale miraha la siixiibidda dadka suuban waxaa ka mid ah, Alle ayay ku xasuusinaysaa, waxay dhalaysaa khayr adduun iyo aakhiraba

**فعَنِ ابْنِ عَبَّاسٍ (رضي الله عنهما) قَالَ : قِيلَ : يَا رَسُولَ اللَّهِ ، أَيُّ جُلَسَائِنَا خَيْرٌ ؟ قَالَ : (مَنْ ذَكَّرَكُمْ بِاللَّهِ رُؤْيَتَهُ ، وَزَادَ فِي عِلْمِكُمْ مَنْطِقَهُ ، وَذَكَّرَكُمْ بِالْآخِرَةِ عَمَلُهُ).**

Waxaa laga wariyay Ibnu Cabbaas – Ilaahay raalli haka noqdee- wuxuu yiri: waxaa la yiri: rasuulkii Allow saaxiibayaasheena kee ugu fiican? Wuxuu yiri: (**Kan aragtidiisa Alle idin xusuusiso hadalkiisana aqoontiina wax ku kordhiya, camalkiisana Aakhira idin xusuusiya**).

Saaxiibka dhabta ah waa muraayadda walaakiisa, khayrka ayuu ku boorriyaa shartana wuu ka reebaa wuxuu ula jeclaanayaa wixii naftiisa uu ula jecel yahay wuxuu yiri Alle:

**وَالْعَصْرِ * إِنّ الْإِنْسَانَ لَفِي خُسْرٍ * إِلَّا الَّذِينَ آمَنُوا وَعَمِلُوا الصّالِحَاتِ وَتَوَاصَوْا بِالْحَقِّ وَتَوَاصَوْا بِالصّبْرِ}،**

(**Waxaan ku dhaaranayaa waqtiga casarka ah * In aadanaha khasaaro ku sugun yahay * Marka laga reebo kuwa rumeeyay xaqa ee camal fiican falay, isuna dardaarmay xaqa, isuna dardaarmay samirka***)

**وعن أنس (رضي الله عنه) عن النبي (صَلَّى اللهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ) قال : (انْصُرْ أَخَاكَ ظَالِمًا أَوْ مَظْلُومًا) ، قلنا : يا رسول الله ، نصرته مظلومًا ، فكيف أنصره ظالماً ؟ قال : (تَكُفُّهُ عَنِ الظُّلْمِ ؛ فَذَاكَ نَصْرُكَ إِيَّاهُ)**

Waxaa laga wariyay Anas inuu yiri nabiga: (**u gargaar walaalkaaga asoo gardaran iyo asoo laga gardaran yahay**) waxaan niri: rasuulkii Allow waan u gargaaray asoo laga gardaran yahay, sideen ugu gargaaraa asoo

gardaran? Wuxuu yiri: (**dulmiga ayaad ka reebaysaa, taasna waa u gargaariddiisa**), sidaanna waa siduu dabbaqay saaxiibka suuban oo arkay saaxiibkiisa xaqqa ka leexanaya oo raacaya shayddaan iyo hawo wuu u caqliceliyay wuuna u caddeeyay xaqqa, wuxuuna kula dardaarmay waxa habboon inuu sameeyo, wuxuuna uga digay ciribdambeedka uu leeyahay ka fogaanshaha Alle, wuxuu yiri Alle:

**{قَالَ لَهُ صَاحِبُهُ وَهُوَ يُحَاوِرُهُ أَكَفَرْتَ بِالَّذِي خَلَقَكَ مِن تُرَابٍ ثُمَّ مِن نُّطْفَةٍ ثُمَّ سَوَّاكَ رَجُلًا * لَّكِنَّا هُوَ اللَّهُ رَبِّي وَلَا أُشْرِكُ بِرَبِّي أَحَدًا * وَلَوْلَا إِذْ دَخَلْتَ جَنَّتَكَ قُلْتَ مَا شَاءَ اللَّهُ لَا قُوَّةَ إِلَّا بِاللَّهِ إِن تَرَنِ أَنَا أَقَلَّ مِنكَ مَالًا وَوَلَدًا * فَعَسَى رَبِّي أَن يُؤْتِيَنِ خَيْرًا مِّن جَنَّتِكَ وَيُرْسِلَ عَلَيْهَا حُسْبَانًا مِّنَ السَّمَاءِ فَتُصْبِحَ صَعِيدًا زَلَقًا * أَوْ يُصْبِحَ مَاؤُهَا غَوْرًا فَلَن تَسْتَطِيعَ لَهُ طَلَبًا * وَأُحِيطَ بِثَمَرِهِ فَأَصْبَحَ يُقَلِّبُ كَفَّيْهِ عَلَى مَا أَنفَقَ فِيهَا وَهِيَ خَاوِيَةٌ عَلَى عُرُوشِهَا وَيَقُولُ يَا لَيْتَنِي لَمْ أُشْرِكْ بِرَبِّي أَحَدًا}.**

**(Wuxuu yiri saaxiibkiisa isagoo la hadlaya ma waxaad ka gaaloowday Allaha kaa abuuray carro, hadana dhibic markaas ku ekeeyay adoo nin ah * hasa yeeshee Ilaahay waa rabbigayga lana wadaajiin maayo rabbigayga (cibaadada) cidna * maxaadan markaad gasho beertaada u dhihin wuxuu doono Alle, xoog ma jiro Alle mooyee, haddaad aragtay anoo kaa yar adiga**

**xoolo iyo caruurba * wuxuu u dhawyahay rabbigayga inuu i siiyo wax ka khayr badan beertaada, kuna diro korkeeda aafo samo, oy markaas ahaato bannaan lagu simbiririxoodo * ama ahaadaan biyaheedu kuwa guray oodan karin doonid (soo celin) * waa la koobay mirihiisii (waa la halaagay) oo ahaaday kii gaddin gacmihiisa wuxuu ku bixiyay iyadoo ku dhacday darbiyadeeda, isagoo leh shalleytee maanan la wadaajin rabbigayga cidna**).

maxaa ka fiican qofka yiri:

إنَّ أخاكَ الحقَّ من كان مَعَك *** ومَـنْ يضرُّ نفسَه لينفَعَكْ
ومَنْ إذا ريَبُ الزمانِ صَدَعكْ *** شتَّتَ فيه شَمْلَهُ لِيَجْمَعَكْ

walaalkaaga dhabta ah waa kan kula jiro ***
waa kan isdhibaya suu kuu anfaco
waa kan marka samanka ku kala yaaciyo
iska daadiya arrinkiisa siduu kuu kulmin lahaa

sidey u leedahay saaxiibtinnimada suuban saameyn fiican waxtar leh adduun iyo aakhiro waxay leedahay

saaxibtinnimada xun saameyn xun, taasoo sameysa shakhsiyadda xun ama wax dumisa ama qalloocan, markaas taas waxay leedahay dhib daran adduunka iyo ciribxumo aakhiro, saaxiibtinnimada xun waxay dumisaa qiyamta fiican, waxayna tirtirtaa akhlaaqda wanaagsan, ubadka iyo dhalinyaradana way hallaysaa, waxqabadkana dib ayay u dhigtaa, beentana way faafisaa iyo baadinimada iyo fidnooyinka, qofka xun wuxuu ka shaqeeyaa qofka saaxiibkiisa siduu ugu lumin lahaa caqiido halleysan iyo fikradaha wax dumiya, quraanka wuxuu noo sheegay muuqaal cad oo uu leeyahay saaxiibka xun, wuxuu yiri Alle -subxaanahu -:

**{فَأَقْبَلَ بَعْضُهُمْ عَلَى بَعْضٍ يَتَسَاءَلُونَ * قَالَ قَائِلٌ مِنْهُمْ إِنِّي كَانَ لِي قَرِينٌ * يَقُولُ أَإِنَّكَ لَمِنَ الْمُصَدِّقِينَ * أَإِذَا مِتْنَا وَكُنَّا تُرَابًا وَعِظَامًا أَإِنَّا لَمَدِينُونَ * قَالَ هَلْ أَنْتُمْ مُطَّلِعُونَ * فَاطَّلَعَ فَرَآهُ فِي سَوَاءِ الْجَحِيمِ * قَالَ تَاللَّهِ إِنْ كِدْتَ لَتُرْدِينِ * وَلَوْلَا نِعْمَةُ رَبِّي لَكُنْتُ مِنَ الْمُحْضَرِينَ * أَفَمَا نَحْنُ بِمَيِّتِينَ * إِلَّا مَوْتَتَنَا الْأُولَى وَمَا نَحْنُ بِمُعَذَّبِينَ * إِنَّ هَذَا لَهُوَ الْفَوْزُ الْعَظِيمُ * لِمِثْلِ هَذَا فَلْيَعْمَلِ الْعَامِلُونَ}**

(**Wuxuuna qaabilay qaarkood qaarka kale (ehlu Jannaha) iyagoo wax iswaydiin * Wuxuuna dhihi mid hadlay oo ka mid ah waxaan kulahaa (adduunkii) saaxiib * wuxuu dhihi jiray adigu ma waxaad ka mid**

**tahay kuwa rumeeyay (soobixinta) * Ma markaan dhimanaa oon carro noqono iyo lafo yaa nala abaalmarin * Wuxuuna dhihi ma dayeysaan * Markaasuu dayay kuna arkay jaxiima dhexdeeda * Wuxuuna dhahay Allaan kudhaartayee waxaad u dhaweyd inaad I halaagto (I dhumiso) * Haddayna Nimcada rabbigayga jirinna waxaan ahaan lahaa kuwa lagu soo kulmiyay (naarta) * (Waxayna dhahaan ehelu jannuhu) miyeynaan dhimaneynin * Geerideenii hore mooyee laynama cadaabayo * Taasina waa uun liibaanta wayn * Ee taasoo kale ha faleen kuwa camal fali**)

Wuxuu yiri Alle:

**{وَيَوْمَ يَعَضُّ الظَّالِمُ عَلَى يَدَيْهِ يَقُولُ يَا لَيْتَنِي اتَّخَذْتُ مَعَ الرَّسُولِ سَبِيلًا * يَا وَيْلَتَى لَيْتَنِي لَمْ أَتَّخِذْ فُلَانًا خَلِيلًا * لَّقَدْ أَضَلَّنِي عَنِ الذِّكْرِ بَعْدَ إِذْ جَاءَنِي وَكَانَ الشَّيْطَانُ لِلْإِنسَانِ خَذُولًا}**

(**Xusuusana Maalintuu Qaniini Daalimku Gacantiisa (Faraha) Isagoo Dhihi Shalleytee maan Yeesho la Jirka Rasuulka Jid (maan Rumeeyo) * Halaag iyo Shalleytee Maxaan hebel Saaxiib uga Yeeshay * Wuxuu iga Leexiyay Quraanka intuu ii yimid kadib, Shaydaanna Dadka Wuxuu u Yahay Dayace (Meel Xun kaga tage)**)

Nabiga - naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee - wuxuu noogu matalay saaxiibka xun kan afuufa buufinka tumaalka wuxuu yiri:

**(إِنَّمَا مَثَلُ الْجَلِيسِ الصَّالِحِ وَالْجَلِيسِ السّوءِ ، كَحَامِلِ الْمِسْكِ، وَنَافِخِ الْكِيرِ، فَحَامِلُ الْمِسْكِ : إِمَّا أَنْ يُحْذِيَكَ ، وَإِمَّا أَنْ تَبْتَاعَ مِنْهُ ، وَإِمَّا أَنْ تَجِدَ مِنْهُ رِيحًا طَيِّبَةً ، وَنَافِخُ الْكِيرِ : إِمَّا أَنْ يُحْرِقَ ثِيَابَكَ ، وَإِمَّا أَنْ تَجِدَ رِيحًا خَبِيثَةً).**

(**Saaxiibka fiican iyo saaxiibka xun tusaalahooda waa sida kan miskiga wada iyo kan buufinka tumaalka afuufaya, kan miskiga inuu wax kuu hadiyeeyo ama aad ka gadato ama aad ka hesho caraf fiican, kan buufinka tumaalka afuufaya inuu dharkaaga gubo ama aad ka hesho ur xun**)

saaxiibtinnimada xun sidoo kale waxaa lagu tiriyaa qalab wax lagu dumiyo nafta iyo qofka kalena lagu dulmiyo, waxaa ugu daran kan kuu kaxeynaya kooxaha lunsan oo wax dumiya oo waddada xaqa ka leexday, kuwaasoo ugu yeeraya burburka fasaadinta dhulka, iyo kan isku dayaya waddada daroogada iyo balwadda inuu kugu jiido hadalkiisa ama dhaqankiisa, maxaayeelay kan iyo kaasba waxay kuu kexeynayaan waddada halaagga

iyo bohosha iyo carada Ilaahay - cazza wajalla -aduun iyo aakhiraba.

**Waxaan oranayaa oraahdayda oo tan ah, Ilaahay ayaan dambidhaaf u weydiinayaa nafteyda iyo idinka**

***

Mahad waxaa iska leh Allaha caalamka oo dhan rabbi u ah, waxaan qirayaa in Ilaah kale jirin Alle keligiisa mooyee mana laha qof wax la wadaago.

Waxaan qirayaa in sayidkeena iyo nabigeena Muxamed uu yahay addoonkiisa iyo rasuulkiisa

Ilaahayow naxariis iyo nabadgelyo nabigeena korkiisa yeel isaga iyo ehelkiisa iyo asxaabtiisa dhammaan, iyo dadkii wanaag ku raacay ilaa maalinta abaalmarinta.

**Walaalaha islaamka ahow:**

Waxaa nagu habboon dhammaanteena inaan ka digtonaano inaan la saaxiibno dadka xunxun iyo inaanan dhexgalin, wuxuu leeyahay Alle -subxaanahu wataacaalaa-:

**{وَقَدْ نَزَّلَ عَلَيْكُمْ فِي الْكِتَابِ أَنْ إِذَا سَمِعْتُمْ آيَاتِ اللَّهِ يُكْفَرُ بِهَا وَيُسْتَهْزَأُ بِهَا فَلَا تَقْعُدُوا مَعَهُمْ حَتَّى يَخُوضُوا فِي حَدِيثٍ غَيْرِهِ إِنَّكُمْ إِذًا مِثْلُهُمْ إِنَّ اللَّهَ جَامِعُ الْمُنَافِقِينَ وَالْكَافِرِينَ فِي جَهَنَّمَ جَمِيعًا}**

(**Wuxuuna idiin ku soo dejiyay korkiinna Kitaabka dhexdiisa haddaad maqashaan Aayaadka Alle oo laga gaaloobi ama lagu jees jeesi ha fariisanina agtooda intay ka dhumbadaan hadal kale, waxaad noqonaysaan iyaga oo kale, Allana wuxuu ku kulmin Munaafiqiinta iyo Gaalada Jahannamo dhammaan**), wuxuu leeyahay Alle:

**{وَإِذَا رَأَيْتَ الَّذِينَ يَخُوضُونَ فِي آيَاتِنَا فَأَعْرِضْ عَنْهُمْ حَتَّى يَخُوضُوا فِي حَدِيثٍ غَيْرِهِ وَإِمَّا يُنْسِيَنَّكَ الشَّيْطَانُ فَلَا تَقْعُدْ بَعْدَ الذِّكْرَى مَعَ الْقَوْمِ الظَّالِمِينَ}**

(**Markaad aragto kuwa dhumban aayaadkanaga, isaga Jeedso intay ka dhumbadaan sheeko kale, hadddduu ku Halmaansiiyo Shaydaanna ha Fadhiyin Xusuusta kadib daalimiinta agtooda**)

Wuxuu leeyahay nabigeena:

**(الْمَرْءُ عَلَى دِينِ خَلِيلِهِ، فَلْيَنْظُرْ أَحَدُكُمْ مَنْ يُخَالِلُ)**

(**Qofka waa diinta saaxiibkiisa ee ha iska fiiriyo midkiina qofka uu la saaxiibayo**)

Wuxuu leeyahay nabiga:

(لَا تُصَاحِبْ إِلَّا مُؤْمِنًا ، وَلَا يَأْكُلْ طَعَامَكَ إِلَّا تَقِيٌّ)

(**Hala saaxiibin qofaan mu'min ahayn, cuntadaadana yuuna cunin qofaan taqi ahayn**), waxaa laga wariyay Ibnu Mascuud inuu yiri: dadka uga qayaas qaata saaxiibayaashooda, qofka lama saaxiibo qofkuu ka helo mooyee, maxaa ka fiican qofka yiri:

**إِذَا كُنْتَ فِي قَوْمٍ فَصَاحِبْ خِيَارَهُم * وَلاَ تَصْحبِ الأردى فتردى مَعَ الرَّدِي**

**عَـنِ الْمَـرْءِ لاَ تَسْأَلْ ، وَسَـلْ عَـنْ قَرِينِـه * فَـكُــلُّ قَـرِيــنٍ بـالْمُقَــارَنِ يَـقْتَــدِي**

Haddaad dad la joogto la saaxiib kooda fiican *
Hala saaxiibin kan halaagsan markaas aad la hagaalsanto
Qofka lama weyddiiyo,weyddii saaxiibkiisa *
Saaxiib kaste wuxuu ku daydaa wadeygiisa

Waxaan adkeynaynaa dhisidda shakhsiyadda iyadoo loo soo marayo saaxiibtinnimada wanaagsan inay tahay mas'uuliyad dadka ka dhexaysa, waxaa habboon bulshada oo dhan inay isugu kaalmaystaan, waxaa laga rabaa dhammaan inay ogaadaan weynida mas'uuliyaddan, wuxuu yiri rasuulka:

**(كُلُّكُمْ رَاع ، وَكُلُّكُمْ مَسْئُولٌ عَنْ رَعِيَّتِه ، الإِمَامُ رَاعٍ وَمَسْئُولٌ عَنْ رَعِيَّتِه ، وَالرَّجُلُ رَاعٍ فِي أَهْلِهِ وَهُوَ مَسْئُولٌ عَنْ رَعِيَّتِه ، وَالمَرْأَةُ رَاعِيَةٌ فِي بَيْتِ زَوْجِهَا وَمَسْئُولَةٌ عَنْ رَعِيَّتِهَا ، وَالخَادِمُ رَاعٍ فِي مَالِ سَيِّدِهِ وَمَسْئُولٌ عَنْ رَعِيَّتِهِ)**

(**dhammaantiina waxaad tihiin ilaaliye, mid kastana waxaa la weyddiinayaa ilaaladiisa, imaamka waa ilaaliye iyo mas'uul waxaa la weyddiinayaa ilaaladiisa, ninkana waa Ilaaliyaha ehelkiisa waxaana la weyddiinayaa ilaaladiisa, haweeneydana waa ilaalisada guriga ninkeeda waxaana la weydiinayaa ilaaladeeda, adeegahana waa ilaaliyaha hantida sayidkiisa waxaana la weyddiinayaa ilaaladiisa**)

waxaa habboon in dhaqsi loogu dadaalo tarbiayada iyo ilaalinta ubadka iyadoo loosoo marayo qoyska iyo dugsiga iyo masjidka iyo dhammaan mu'asasooyinka bulshada ee tarbiyada iyo fikirka iyo warbaahinta, iyo in laysugu kaalmeeyo dadaalka sidii looga ilaalin lahaa ubadka iyo dhalinyarada fikriga xagjirka iyo kooxaha wax burburiya, iyo in laga shaqeeyo sidey dadka dalkooda ugu xirnaan lahaayeen, ilaalinta ilmaheena iyo barbaarteena, iyo la wadaagiddooda markay dooranayaan saaxiibayaashooda, waa amaano weyn, iyo mas'uuliyad ballaaran, wuxuu yiri Alle:

{يَاأَيُّهَا الَّذِينَ آمَنُوا قُوا أَنْفُسَكُمْ وَأَهْلِيكُمْ نَارًا}

(**Kuwa xaqa rumeeyow ka dhawra Naftiina iyo ehelkiinna naar**)

Wuxuu yiri rasuulka:

**(إِنَّ اللَّهَ سَائِلٌ كُلَّ رَاعٍ عَمَّا اسْتَرْعَاه ، أَحَفَظَ ، أَمْ ضَيَّع ؟ حَتَّى يَسْأَلَ الرَّجُلَ عَنْ أَهْلِ بَيْتِهِ)**

(**Ilaahay wuxuu weyddiinayaa qof kaste wuxuu u dhiibtay ma ilaaliyay ama waa dayacay? ilaa uu ka weyddiiyo ninka qoyskiisa**)

**Ilaahayow nagu arsaaq saaxibtinnimada suuban, noona xaqiiji miraheeda, rabbilcaalamiinow**